# Siyaasadda Kasoo Ururinta Biilka Bukaanka

BJC Health ("BJC") iyo isbitaalladeenna xubnaha ka ah waxay rabaan inay kaa caawiyaan fahamka habka biil-bixin ta iyo ururinta iyo ilaha kuu diyaarsan adiga iyo qoyskaaga.

Isbitaallada xubnaha ka ah BJC waxay bixin doonaan daryeel iyada oo aan takoor lahayn xaaladaha caafimaad ee degdegga ah iyadoon loo eegin awoodda bukaanka ee bixinta. Haddii aad leedahay dabool caymis sida Medicare, Medicaid, caymis dowladeed ama caymis kale oo caafimaad, BJC waxay u diri doontaa biilka caymiska ka dib daaweyntaada. Haddii aad caymis leedahay oo aad qabto su'aalo ku saabsan daboolkaaga ama heerka faa'iidooyinkaaga, fadlan la xiriir bixiyahaaga caymiska.

## Maalinta Adeegga

Ka hor ama maalinta adeegga, waxaa laga yaabaa in lagaa codsado inaad bixiso mas'uuliyaddaada la qiyaasay ee adeegyada. Haddii aad caymis leedahay, mas'uuliyadda la qiyaasay waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo lagu salaynayo faa'iidooyinka caymiskaaga. Haddii aadan caymis lahayn, waxaa lagaa codsan doonaa dhigaal. Haddii aad caymis leedahay oo aad qabto su'aalo ku saabsan daboolkaaga ama heerka faa'iidooyinkaaga, fadlan la xiriir bixiyahaaga caymiska. Bukaannada aan caymiska lahayn waxay si toos ah u heli doonaan qiimo-dhimis boqolkiiba 40 ah khidmadaha lagu dalacay waxaana loo tixgelin doonaa kaalmada. Iyadoo ay ku xiran tahay nooca adeegga iyo heerka gargaarka dhaqaale, waxaa laga yaabaa in loo baahdo bixinta qayb ka mid ah lacagta. Waxaan ku siin karnaa jaantuska Dakhliga iyo Qiimo-dhimista ee Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale oo muujinaya qadarka lacagaha la bixinayo marka la codsado.

## Warqadaha Biilka

Ka dib daaweyntaada, warqadaha biilka ayaa laguu soo diri doonaa wixii qadar ah oo aad ku leedahay. Bixinta dhammeystiran waxaa la filayaa in lagu bixiyo 30 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda warqadda biilka. Haddii aad u baahan tahay caawimaad bixinta biilkaaga, aad rabto inaad samaysato qorshe bixineed, ama lagu tixgeliyo gargaarka dhaqaale, waa muhiim inaad si degdeg ah nala soo xiriirto adigoo wacaya lambarka ku qoran warqadda biilka si looga hortago in akoonkaaga loo wareejiyo hay'ad ururin. Marka lagu daro warqadaha biilka, waxaa laga yaabaa in laguu soo waco taleefan ku saabsan akoonkaaga.

## Su'aalaha Biilka, Dacwooyinka, ama Codsiyada Biil Faahfaahsan

Fadlan nala soo xiriir adigoo wacaya lambarka ku qoran warqadda biilka haddii aad rabto inaad wax ka weydiiso ama aad ka dooddo biilkaaga.

Biil faahfaahsan oo ku saabsan khidmadaha adeegyada ay bixisay isbitaalku waa la heli karaa marka la codsado.

## Qorshayaasha Lacag-bixinta

Haddii aadan awoodin inaad si buuxda u bixiso hadhaagaaga, qorshayaal bixineed ayaa diyaar ah iyadoo ugu yaraan bixinta bil kasta ay tahay $25. Waa muhiim in la sameeyo qorshe bixineed iyada oo loo marayo bogga bukaanka (patient portal) ama adigoo wacaya lambarka ku qoran warqadda biilkaaga si loo hubiyo in qorshaha la oggolaaday oo la dhaqan geliyay. Samaynta bixino qayb ah iyada oo aan la lahayn qorshe bixineed waxay sababi kartaa in akoonkaaga loo wareejiyo hay'ad ururin.

| HAGITAANNADA QORSHAHA BIXINTA | |
|---|---|
| **Haraaga Akoonka** | **Muddada Ugu Badan** |
| Wax ka yar $500 | 12 billood |
| $500–$1,499 | 18 billood |
| $1,500–$4,999 | 24 billood |
| $5,000 ama ka badan | 36 billood |

## Hay'adaha Ururinta Biilasha

Isbitaallada xubnaha ka ah BJC waxay adeegsadaan hay'adaha ururinta biilasha si ay uga caawiyaan ururinta haraaga aan la bixin. Haraaga aan la bixin ee aan lagu darin qorshe bixineed oo la dejiyay waxaa loo wareejin karaa hay'ad ururin ka dib marka bukaanka loo diro ugu yaraan saddex warqadood oo biil ah.

Haraaga aan la bixin ee la helo warqado soo noqday waxaa loo gudbin karaa hay'ad ururin wakhti kasta inta lagu jiro habka ururinta. Warqadaha ururinta waxaa u diri doona hay'adda ururinta qofka mas'uulka ka ah. Intaa waxaa dheer, wicitaanno taleefan ayaa laga yaabaa in lagu sameeyo haraagyadan taagan.

Waxaad codsan kartaa gargaarka dhaqaale wakhti kasta inta lagu jiro habka ururinta, ilaa 240 maalmood ka dib biilkaaga ugu horreeya. Waxaad heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale ee BJC iyo codsi, ama waxaad samayn kartaa codsi si aad u hesho ogeysiis qoraal ah ama isgaarsiin elektaroonik ah adigoo la hadlaya wakiil Adeegyada Bukaanka ama adigoo wacaya:

- Lambarrada 314-362-8400 ama 855-362-8400 ee BJC HealthCare
- Lambarrada 816-932-5678 ama 888-581-9401 ee Saint Luke's
- Lambarrada 417-815-8846 ama 833-345-1395 ee St. Louis Children's at CoxHealth

Macluumaadka iyo foomamka codsiga sidoo kale waxa laga heli karaa onleen:

- BJC.org ee BJC HealthCare
- SaintLukesKC.org/financial-assistance ee Saint Luke's
- BJC.org ee St. Louis Children's at CoxHealth

Fadlan xor ayaad u tahay inaad wax ka weydiiso Gargaarka Dhaqaale. Waxa aanu halkan u joognaa in aanu ku caawino.

3259250-01-20-2026

# Siyaasadda Kasoo Ururinta Biilka Bukaanka

BJC Health ("BJC") iyo isbitaalladeenna xubnaha ka ah waxay rabaan inay kaa caawiyaan fahamka habka biil-bixinta iyo ururinta iyo ilaha kuu diyaarsan adiga iyo qoyskaaga.

Isbitaallada xubnaha ka ah BJC waxay bixin doonaan daryeel iyada oo aan takoor lahayn xaaladaha caafimaad ee degdegga ah iyadoon loo eegin awoodda bukaanka ee bixinta. Haddii aad leedahay dabool caymis sida Medicare, Medicaid, caymis dowladeed ama caymis kale oo caafimaad, BJC waxay u diri doontaa biilka caymiska ka dib daaweyntaada. Haddii aad caymis leedahay oo aad qabto su'aalo ku saabsan daboolkaaga ama heerka faa'iidooyinkaaga, fadlan la xiriir bixiyahaaga caymiska.

## Maalinta Adeegga

Ka hor ama maalinta adeegga, waxaa laga yaabaa in lagaa codsado inaad bixiso mas'uuliyaddaada la qiyaasay ee adeegyada. Haddii aad caymis leedahay, mas'uuliyadda la qiyaasay waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo lagu salaynayo faa'iidooyinka caymiskaaga. Haddii aadan caymis lahayn, waxaa lagaa codsan doonaa dhigaal. Haddii aad caymis leedahay oo aad qabto su'aalo ku saabsan daboolkaaga ama heerka faa'iidooyinkaaga, fadlan la xiriir bixiyahaaga caymiska. Bukaannada aan caymiska lahayn waxay si toos ah u heli doonaan qiimo-dhimis boqolkiiba 40 ah khidmadaha lagu dalacay waxaana loo tixgelin doonaa kaalmada. Iyadoo ay ku xiran tahay nooca adeegga iyo heerka gargaarka dhaqaale, waxaa laga yaabaa in loo baahdo bixinta qayb ka mid ah lacagta. Waxaan ku siin karnaa Jadwalka Dakhliga iyo Qiimo-dhimista ee Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale marka aad codsato, kaas oo muujinaya qaddarrada bixinta.

## Warqadaha Biilka

Ka dib daaweyntaada, warqadaha biilka ayaa laguu soo diri doonaa wixii qadar ah oo aad ku leedahay. Bixinta dhammeystiran waxaa la filayaa in lagu bixiyo 30 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda warqadda biilka. Haddii aad u baahan tahay caawimaad bixinta biilkaaga, aad rabto inaad samaysato qorshe bixineed, ama lagu tixgeliyo gargaarka dhaqaale, waa muhiim inaad si degdeg ah nala soo xiriirto adigoo wacaya lambarka ku qoran warqadda biilka si looga hortago in akoonkaaga loo wareejiyo hay'ad ururin. Marka lagu daro warqadaha biilka, waxaa laga yaabaa in laguu soo waco taleefan ku saabsan akoonkaaga.

## Su'aalaha Biilka, Dacwooyinka, ama Codsiyada Biil Faahfaahsan

Fadlan nala soo xiriir adigoo wacaya lambarka ku qoran warqadda biilka haddii aad rabto inaad wax ka weydiiso ama aad ka dooddo biilkaaga.

Biil faahfaahsan oo ku saabsan khidmadaha adeegyada ay bixisay isbitaalku waa la heli karaa marka la codsado.

## Qorshayaasha Lacag-bixinta

Haddii aadan awoodin inaad si buuxda u bixiso hadhaagaaga, qorshayaal bixineed ayaa diyaar ah iyadoo ugu yaraan bixinta bil kasta ay tahay $25. Waa muhiim in la dejiyo qorshe bixineed adigoo adeegsanaya bogga bukaanka ama adigoo wacaya lambarka ku qoran warqadda biilkaaga si loo hubiyo in qorshuhu la oggolaaday oo uu hirgalay. Samaynta bixino qayb ah iyada oo aan la lahayn qorshe bixineed waxay sababi kartaa in akoonkaaga loo wareejiyo hay'ad ururin.

| HAGITAANNADA QORSHAHA BIXINTA | |
|---|---|
| **Haraaga Akoonka** | **Muddada Ugu Badan** |
| Wax ka yar $500 | 12 billood |
| $500–$1,499 | 18 billood |
| $1,500–$4,999 | 24 billood |
| $5,000 ama ka badan | 36 billood |

## Hay'adaha Ururinta Biilasha

Isbitaallada xubnaha ka ah BJC waxay adeegsadaan hay'adaha ururinta biilasha si ay uga caawiyaan ururinta haraaga aan la bixin. Haraaga aan la bixin ee aan lagu darin qorshe bixineed oo la dejiyay waxaa loo wareejin karaa hay'ad ururin ka dib marka bukaanka loo diro ugu yaraan saddex warqadood oo biil ah. Haraaga aan la bixin ee la helo warqado soo noqday waxaa loo gudbin karaa hay'ad ururin wakhti kasta inta lagu jiro habka ururinta. Warqadaha ururinta waxaa u diri doona hay'adda ururinta qofka mas'uulka ka ah. Intaa waxaa dheer, wicitaanno taleefan ayaa laga yaabaa in lagu sameeyo haraagyadan taagan.

Waxaad codsan kartaa gargaarka dhaqaale wakhti kasta inta lagu jiro habka ururinta, ilaa 240 maalmood ka dib biilkaaga ugu horreeya. Waxaad heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale ee BJC iyo codsi, ama waxaad samayn kartaa codsi si aad u hesho ogeysiis qoraal ah ama



3259250-01-20-2026

isgaarsiin elektaroonik ah adigoo la hadlaya wakiil Adeegyada Bukaanka ama adigoo wacaya:

- Lambarrada 314-362-8400 ama 855-362-8400 ee BJC HealthCare
- Lambarrada 816-932-5678 ama 888-581-9401 ee Saint Luke's
- Lambarrada 417-815-8846 ama 833-345-1395 ee St. Louis Children's at CoxHealth

Macluumaadka iyo foomamka codsiga sidoo kale waxa laga heli karaa onleen:

- BJC.org ee BJC HealthCare
- SaintLukesKC.org/financial-assistance ee Saint Luke's
- BJC.org ee St. Louis Children's at CoxHealth

Fadlan xor ayaad u tahay inaad wax ka weydiiso Gargaarka Dhaqaale. Waxa aanu halkan u joognaa in aanu ku caawino.



3259250-01-20-2026